

## **Guulaha ayaan dhammaad lahayn aadna u badnaan kara meel ay ku eg yihiina aysan jirin barnaamijka Skyline ee C.A.S. Naadiyada**

Shimbiro daawasho, kaalafotada Lego, beera qodasho, farshaxan wax maanka aad loogu hayay markii la sameeyay, kala saarida waxyaabaha ee lagu sameeyo kombuyuutarada ee coding, socod iyo orad, isxakamayn heer sare ah oo masuuliyad caalami ah xambaarsan. Kulli waxyaabahaasi waxay ugu jiraan shaqada subaxii ardayda Skyline K-8, ayadoo Arbaco kasta ay ku bilaabato ka qeyb qaadashada mid ka mid ah naadiyada iskoolka ee faraha badan ee C.A.S.

“C.A.S.” waxay u taagan tahay “Halabuur. Hawl. Adeegga. ”, saddex qeybood oo ah barnaamijka Caalamiga ah ee Baccalaureate manhajka wada dhan ee cunuga laakiin markii loo eego xubnaha yaryar ee Mr. Naadiga beeraqodashada ee Fanning iyo xarfo magacyo laga soo gaabiyay oo sidii hore ka saxsan waxay noqon karaan “F.U.N.”

“Qeybta aan ugu jeclahay beera qodashada waa sida aad u barato saaxiibo cusub oo ula hadasho aadna geedaha hareerahooda u carcarartaan qorraxdana aad isugu dhigtaan,” sidaasi waxaa tiri Cadron Eastin oo ah garaydhka labaad. “Waa wax wacan sidoo kale markii aad u sugt si sabir leh ubax inuu baxo.”

“Waxaan jeclahay saaxiibkeyga ugu fiican, Omar, miyaysan ahaynt,” sidaasi waxaa yiri Harry Denison oo dhigta iskoolka barbaarinta ubadka ee ka horeeya dugsi hoose.

Naadiyada rubuc sanadlaha ah waxaa looga gol leeyahay qeyb ahaan in lagu siiyo ardayda Skyline, kuwaasoo midna uusan awoodin inuu iskoolka usoo lugeeyo, inay helaan mahadhooyin noocooda ay afaaqda ballaarinayaan oo hawlaha manhajka dheeriga ku ah ay bixiyaan. Sidoo kale waxay u saamaxaan arday yaryar inay dhex galaan kuwa ka weyn waxayna bareyaasha fursad usiiyaan inay dhexgalaan oo tacaamul wacan la yeeshaan isla markaana hagaan carruurta heerar kastoo garaydh leh.

“Waxaan ka helaa runtii farxad aad ah inaan arko ardayda iskoolka barbaarinta ilaa kuwa garaydh sideed inay isu yimaadaan ayagoo ujeedo mideysan leh,” sidaasi waxaa tiri Mudiirad Sherry Malone. “Iskoolkeenu wuu yaryahay aad ayaana ardayda xiriir wacani uga dhexeeyaa, laakiin sidaasi oo ay tahay, ka hor intii aanaan daah furin barnaamijkaan, arday badan oo iskoolkeena ka tirsan ayaan midba midka kale magaciisa uusan aqoonin awalkii. Waxaanu rajeyneynaa in hawlahaani baddalaan taa oo qof waliba qofka kale ay is bartaan.

Baraha culuumta bulshada ee dugsi dhexe iyo farshaxanka Michael Fanning, oo asagu ka shaqeeya naadiga beera qodashada ayadoo ay kaaleyso qofka iskaa wax u qabsada ku shaqeeya ee waalidiinta ka tirsan ee Allie Novak waxaa uu sheegay in mid ka mid ah waxyaabaha farax gasha ee barnaamijka naadiga C.A.S. uu xaqiiqo yahay fursad waqti wacan lagula qaaato ardayda da'da yar. Mid kale waa dabiiciga beera qodashada qudheeda.

“Ardayda ayaa runtii fahma in arladu nooshahay sida ay u nool yihiin ayagu oo kale,” Fanning ayaa tiri sidaas. “Sidoo kale waa arrin aad u wacan inaanu wadaka wada shaqeyno barnaamij yool hiigsi dheer oo natiijo wacan. Beera qodasho kuma heleysid durba mahadnaq degdeg ah. Waa inaad sugto asbuucyo, mararka qaarna bilo, si aad u aragto miraha shaqadaada, taasina waxay cashar wacan u tahay ciyaalka.”

Bareyaasha ayaa xusha mawduucyo badan oo kuwa naadiga ah, laakiin ardayda ayaanan ka xishoon inay suaalaan kuwa ay doonayaan sidoo kale.

“Sidaas ayaanu ku aburnay naadiga Dungeons iyo Dragons,” Malone ayaa sidaasi tiri. “Aad ayay caam u tahay, waxayna ila tahay kaasi waa dhan wacan oo uu leeyahay barnaamijkaani – ardayda ayaa baranaaya sidii ay naftooda ugu doodi lahaayeen.”

Skyline ardaydiisu waxay si cad ula yara qabsanayaan naadiyadooda C.A.S. laakiin xaqiiqda yaa ah waxaan dhammaanteen fursad u heysanaa inaan ayaga wax ka barano. Ka fakar naadiga guddiga ardayda oo isu keena ardayda dhigata garaydhada afarad iyo sideedaad si ay u sameeyaan tijaabo kusaabsan dimoqraadiyada tooska ah.

Eva Breen, waxay dhigataa garaydhka sideedaad waxayna tahay madaxweynaha guddiga ardayda waxayna sheegtay in kala duwanaanshiyaha da’da ee naadigu tahay mid ka mid ah awoodaha waaweyn ee guddiga.

“Waxaanu helnaa aaraa kala gadisan iyo ahmiyado kuwaasi oo dhabtii aad u wacaan,” Breen ayaa sidaasi tiri. “Kani 100kiiba boqol waa urur dhallinyaro ay hoggaamiso. Waxaanu leenahay xoghayeyaal iyo qasnajiyaal iyo madaxweyne kuxigeeno qof walbana midka kale yuu wax ka bartaa qof walbana codkiisa waa la maqlaa. Waxaanu u codeynaa wax walba. Waa dimoqraadiyad guud, ilaa iyo haatana si wacan ayay hawshu usocotaa. Waanu mideysan nahay dhabtii waxaana naga go’an inaan iskuulkeena ka dhigno meel sidii horay ay u ahaan jirtay ka fiican.